



**Ma jeclaan lahayd
inaad ka hadasho wax
ku saabsan gudniinka
fircooniga iyo
saamaynta uu
leeyahay?**

Gudniinka Fircoonigu (FGM) waa ka mamnuuc gudaha Finland, balse waxaad weli xaq u leedahay inaad raadsato caawimaad arrintan ku saabsan. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan gudniinka ficooniga ama ay ku haystaan dhibaaatooyinka Gudniinka Fircooniga (FGM), shaqaalaheena Adeegyada Fayo-qabka ee Degmada Galbeed ee Uusimaa (LUVN) ayaa jeclaan lahaayeen inay arrinta kaala hadlaan ayna kuu tilmaamaan goobta saxda ah.



Haddii aad macmiil u tahay rugta caafimaadka hooyada iyo dhallaanka, arrinta ayaad kala hadli kartaa kalkaalisada rugta caafimaadka (telefoonka 0291512000/khadka dhexe ee LUVN).



Haddii aad dugsi dhigato ama aad waxbarato, waxaad arrinta kala hadli kartaa kalkaalisada daryeelka ardayga, shaqaalaha bulshada ee dugsiga ama dhakhtarka cilmi-nafsiga (shaqaale ka tirsan dugsigaaga: telefoonka 0291512000/khadka dhexe ee LUVN).



Haddii lagugu sameeyay Gudniinka Fircooniga (FGM) oo aad qabto wax xannuun ah, dhibaato ama raaxo la'aan ah, ballan ka qabso dhakhtarka xarunta caafimaadka. Dhakhtarka ayaa qiimeyn doona baahida aad u qabto daaweyn dheeraad ah. (Ballamaha xarumaha caafimaadka: telefoonka 0291512000/khadka dhexe ee LUVN).



Haddii uu kugu reebay mahadho adag, cabsi ama xasuuso ku dhibaya, ballan ayaad ka qabsan kartaa adeegyada caafimaadka dhimirka ee dadka waaweyn (telefoonka 0291512295)

Cabsi miyaad ka qabtaa in qof kuu dhow uu qorsheynayo gudniinka fircooniga?

**Si degdeg ah, ayaad u wici kartaa
shaqaalaha daryeelka carruurta:**



Espoon keskus: 046 877 1424
Koonfurta Espoo: 046 877 1868
Leppävaara, Kauniainen: 046 877 2087
Hanko, Inkoo, Kirkkonummi, Raasepori, Siuntio:
040 646 6232
Lohja, Karkkila, Vihti: 050 048 6101

**Miyaad ka walaacsan tahay ra'yiga ama
mawqifka ama saamaynta dhaqameed ee
qoyska ama qaraabada?**



Waxaad la xiriiri kartaa
African Care ry., Batulo Essak (luuqadaha Af
Finnish, Soomaali, Ingiriisi) telefoonka 0400 671288
The Finnish League for Human Rights, Solomie
Teshome (luuqadaha Af Finnish, Amxaari, Ingiriisi)
telefoonka 044 7420411



Shabakadda jilaayaasha
xirfadaha kala duwan leh ee
gudniinka fircooniga (FGM) ee
Adeegyada Fayoqabka ee
Degmada iyo Gobolka Uusimaa

Länsi-Uudenmaan hyvinvointialue
Västra Nylands välfärdsområde
Western Uusimaa Wellbeing Services County